La xiriir gacanhayahaaga haddii aad wax su´aalo ah qabtid.

Weli kaalmada dhaqaalaha (lacagta cayrta) foomka codsiga waraaqaha ah waad kusoo codsan kartaa.

Göteborgs Stad 230125-001-060 Tryck: Egen utskrift SOMALISKA Januari 2023



# Dib uga codso kaalmada dhaqaale (lacagta cayrta/ caydha) bogga internetka

- **Waxaad dib usoo codsan kartaa habeen iyo maalinba**
- **Uma baahnid inaad soo booqatid xafiiska adeegga bulshada si aad dib ugu soo codsatid**
- **Uma baahnid inaad soo dirtid waxyaalaha gundhigga u ah codsiga (laakiin waa inaad keydsatid)**
- **Waxaad kala socon kartaa kiiskaaga oo go´aanka lagaa gaaray ka arki kartaa Mina sidor**

Ma kuu furan yahay kiis ku saabsan kaalmo dhaqaale? Waxaad markaas dib uga soo codsan kartaa Bogga Göteborgs Stad.

Haddii uusan kiis kuu furnayn waa inaad la xiriirtid xafiiska adeegga bulshada si aad ballan ugu qabsatid kulan si shaqsi ah lagu la kulmayo marka ugu horraysa ee codsiga aad soo gudbinaysid.

## Ka hor inta aadan gelin

- Waxaad u baahan tahay aqoonsi elektoroonig ah si aad dib uga soo codsatid bogga internetka. Aqoonsiyada elektorooniga ah ee shaqeeya waa Bank-ID, mobilt BankID ee telefoonka gacanta iyo aqoonsiga elektorooniga ah ee Telias e-legitimation. Waxaad aqoonsi elektoroonig ah ka samaysan kartaa bangigaaga ama Telia.
- Haddii aad la codsanaysid qof kale (say/oori, qof aad wada nooshihiin ama lammaane) waa khasab in qofkaas sidoo kale uu leeyahay Bank-ID, mobilt BankID ama aqoonsiga elektorooniga ah ee Telias e-legitimation.
- Ka hor inta aadan bilaabin inaad dib usoo codsato waa inaad isku soo uruurisid waraaqaha gundhigga ( tusaale ahaan jawaabaha ku saabsan dakhliga kusoo gala ama lacago kaalmo ah, rasiidyo iyo waraaqaha lacagaha lagu soo dirsado).
- Sug inaad dib u codsatid illaa aad ka helaysid dhammaan xogta lagu salaynayo (waraaqaha)!

## Sidaan samee

- Gal Mina sidor ee goteborg.se adigoo adeegsanaya Bank-ID, mobilt BankID ama aqoonsiga elektorooniga ah ee Telias e-legitimation.
- Ka jawaab tiro su´aalo ah oo ku saabsan xaaladaada nololeed iyo dhaqaale (dhakhliga kusoo gala iyo kharashaadka). Uma baahnid inaad soo raacisid wax gundhig ah (waraaqo/dukumenti).
- Haddii aad qof kale lasoo codsatay waa in qofkaas oggolaado codsiga dib u codsashada isagoo isticmaalaya Bank-ID, mobilt Bank-ID ee telefoonka gacanta ama aqoonsiga elektorooniga ah ee Telias e-legitimation.

## Keydso rasiidyada iyo xogta gundhigga ah

- Degmada Göteborgs Stad waxay si bakhtiyaa nasiib ah ugu dooranayaan codsiyada qaarkood (sambal) inay kontorool ku sameeyaan. Taasi waxay la micne tahay in codsigaagu kusoo bixi karo in kontorool lagu sameeyo. Markaas waa inaad soo bandhigi kartid rasiidyada iyo waxyaalaha kale ee codsiga gundhigga u ah.
- Waa sharci darro in xog khalad ah lasoo gudbiyo. Waxay taasi keeni kartaa inaad ku khasbanaatid inaad dib usoo celisid kaalmada dhaqaale. Waxay sidoo kale keeni kartaa in dacwad booliis lagaa gudbiyo. Sidaas darteed waa muhiim in xogtaada ku jirta codsiga dib usoo codsashada ay sax tahay iyo inaad soo bandhigi kartid xogta lagu saleeyay markii kontorool yimaado.